



Oregon

Kate Brown, Governor

Waaxda Adeegyada Aadanaha

Waayelada iyo Dadka qabo

Naafanimada

500 Summer St. NE

Salem, OR 97301

1-800-241-3013

Janaayo 24, 2022



Shaqaalaha Daryeelka Guriga ee Qaaliga ah:

Labadii sana ee la soo dhaafay oo dhan, waxaan adiga kula soo wadaagnay macluumaadka ku saabsan xeerka Golaha Guurtida ee 1534 iyo tababarka loo baahan yahay ee loogu talagalay shaqaalaha daryeelka guriga. Sharci ahaan, dhammaan shaqaalaha daryeelka guriga waa inay dhammaystiraan tababarka looga baahan yahay. **Waa inaad dhammaysataa tababarka lagaga baahan yahay ee dib u cusboonaysiinta ee Maarso 31, 2022.**

Ujeedada warqadan waa in lagu xasuusiyo in wakhtiga kama dambaysta ah ee ku aadan dhamaystirka tababarka dib u cusboonaysiinta uu si degdeg ah u soo dhawaaday. Waxaanu rabnaa inaanu xaqiijinno inaad haysato macluumaadka aad u baahan tahay si aad isku diiwaangeliso adiga oo an dib u dhicin. Haddii aad hore u dhammaysatay tababarka dib u cusboonaysiinta, taasi waa arin fiican. Ma jiraan wax kale oo aad u baahan tahay inaad sameyso. Hal mar oo kaliya waa inaad qaadataa tababarka dib u cusboonaysiinta, xitaa haddii aad sidoo kale u shaqeyso sidii shaqaale taageero shakhsiyeed ahaan ama adeege daryeel shaqsiyeed ahaan.

Shaqada aad u qabato sidii shaqaale daryeel guri ahaan waa la qiimeeyaa oo waxay ka caawisaa dadka waayeelada ah iyo dadka naafada ah inay ahaadaan kuwa badqabo oo ayna ku madaxbanaanaadaan guriga iyo bulshadooda dhexdeeda. Waxay ku xisaabtamaan adeegyada iyo taageerada aad siiso. Tani waa sababta ay aadka muhiimka u tahay in la dhamaystiro tababarka dib u cusboonaysiinta marka la gaaro **Maarso 31, 2022**. Shaqaalaha aan dhamaystirin tababarka loo baahan yahay meesha lagu gaaro waqtiga kama dambaysta ah waxa loo soo diri doona ogeysiis shaqa joojin ah. Tan waxaa loola jeedaa in aysan mar dambe awoodi doonin inay u shaqeeyaan sidii shaqaale daryeel guri ahaan.

Si aad u xaqiiso inaad dhammaysatay tababbarkaaga loo baahan yahay ama aad qabto su'aalo, waxaad kala xiriiri kartaa Tababarka Carewell SEIU 503 1-844-503-

“Badbaado, caafimaad iyo madaxbannaani dhammaan dadka Oregon”

Loo-shaqeeye Fursaddiisa Loo Siman Yahay

7348 ama Qaybta Xiriirka Bixiyaha ee ka tirsan Waayelada iyo Dadka qaba Naafanimada 1-800-241-3013.

Si aad iskugu diiwaangeliso tababarka dib u cusboonaysiinta, fadlan booqo Mareegta Tababarka Carewell SEIU 503 <https://www.carewellseiu503.org/training/>. Fadlan dooro "Tababarka Dib u cusbooneysiinta Shaqaalaha Hadda." Tababarkan ayaa isugu jira cutubyo onlayn ah oo iska u bara ah iyo siminaaro uu hogaamiyo tababaraha tooska ah waana wadar dhan 12 saacadood. Cutubyada iskaa u bara ah uma baahna in lagu dhammaystiro inta lagu guda jiro hal fadhi oo waad bilaabi kartaa waadna joojin kartaa sidaad u baahato. Siminaarada onlaynka ee tooska ah ayaa la heli karaa dhowr jeer todobaadkiiba, oo ay ku jiraan fiidkii iyo dhammaadka isbuucyada. Waa inaad dhamaystirtaa cutubyada onlaynka ah **iyo** siminaarka meesha lagu gaaro waqtiga kama dambaysta ah.

Waxaad heli doontaa \$200 oo guno ah oo loo maro Tababarka Carewell SEIU 503 marka aad si guul leh u dhamaystirto tababarka dib u cusboonaysiinta.

Waxa jira hal ka reeban dhammaystirka tababarka. Haddii aad haysato shahaado hada ay kugu abaalmarisay Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon, uma baahnid inaad qaadato tababarka dib u cusboonaysiinta. Shahaadooyinka waxaa ka mid ah: Shahaadada Hormarinta Xirfadlayaasha (PDC), HCW ama PSW Hormarsan, PSW Gaar ah, Baralayaka Qoorta ee Hawoqaade-Ku-tiirsan (VDQ), ama shahaadada shaqaalaha caafimaadka bulshada.

Si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tababarka loo baahan yahay, fadlan akhri dukumentiyada ku lifaaqan.

Waxa sidoo kale aad dhageysan kartaa Maqaladda Xiriirinta OHCC ee laga helo mareegto Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon ee barta.

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/HCC/Pages/Senate-Bill-1534-Updates.aspx>.

Waad ku mahadsan tahay adeegyada iyo taageerada aad siiso dadka waayelada ah iyo dadka qaba naafanimada.

Daacadnimo,

Xafiiska Waayelada iyo dadka Naafada ah
Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon